



Maxaad U baahan Tahay Inaad Ka Ogaato Tallaalada COVID-19 ka ee Caruurta

1. Talaalka COVID-19 ka wuxuu jidhkeenna baraa sida loola dagaallamo COVID-19 ka iyada oo aan dhab ahaan xanuunsanayn.

Tallaalada COVID-19 ka ayaa jidhkeenna u siinaya si qarsoodi ah oo ku saabsan sida fayraska COVID-19 ka u shaqeeyo si habka difaaca jidhkeennu u garto oo ula dagaallamo. Waxay batraa jidhkeenna inay sameeyaan borotiinno u gaar cudurrada loo yaqaanno difaaca jirka si ay inooga difaacaan Tallaalada COVID-19 kuma qaadno COVID-19.

2. Daraasaduhu waxay muujinayaan talaallada COVID-19 ka inay badbaado iyo waxtar u leeyihiin carruurta ay da'doodu u dhexayso 12-15 jirka.

Dhamaan talaallada COVID-19ka ee laga heli karo Maraykanka waxaysoo mareen tijaabooyin caafimaad waxaana loo oggolaaday isticmaalka degdegga ah Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Maraykanka. Waxaa ku taliyey khabarada caafimaadka iyo caafimaadka dadwaynaha ee heer qaran iyo halkan Vermont.

Tijaabada caafimaadka ee talaalka Pfizer ee caruurta 12-15 jirrada ah waxa ay muujinaysaa in talaalku uu amaan u yahay oo uu wax u taro kooxdaas. Ma jiraan caruur lagu talaalay talaalka Pfizer intii lagu jiray tijaabada caafimaadka kamanay qaadin COVID-19.

Tijaabada talaalka Pfizer ee caruurta ilaa 6 jirka ah ayaa iminka bilaabantay, oo dhawaan ayaa la heli doonaa macluumaad dheeraad ah.

3. Helitaanka talaalka COVID-19 waxay u leedahay faa iidooyin waaweyn Carruurta Vermont.

Laga bilaabo bisha Maayo 2021, in ka badan 4,000 oo carruur ah oo reer Vermont ah ayaa laga helay COVID-19ka tan iyo markii cudurku bilaabmay, taasina waxay saameyn weyn ku yeelatay carruurteenna, qoysaskeenna, barnaamijyada daryeelka carruurta iyo dugsiyadeenna. Helitaanka tallaallida carruurteenna waxay ka dhigeysaa mid ammaan ah oo caafimaad qaba waxayna gacan ka geysan doontaa joojinta faafitaanka COVID-19ka ee bulshadeenna.

Is tallaalida sidoo kale macnaheedu waa xorriyad dheeri ah sidaa darteed caurrurta Vermont waxay noqon karaan carruur. Waxay arki karaan asxaabtooda kale ee la tallaallay iyagoon walwal qabin, u safri kara inay booqdaan qoyskooda meel ka baxsan Vermont, oo ay ka baxaan baahida karantiilka haddii loo arko inay weligood xirriir dhow la leeyihiin qof qaba COVID 19 ka.

4. Tallaalada COVID-19 waxa la soo saaray kadib **tobanaan sano oo cilmibaaris ah.**

In kasta oo fayraska COVID-19 ka laftiisu uu cusub yahay, hadana saynisyahanadu waxay darsen noocyadan fayraska, oo loo yaqaan ‘coronaviruses’ muddoasad ku sameeyeen noocyadan fayraska, loo yaqaan ‘korona fayras’, mudo tobanaan sano ah. Markii la aqoonsaday COVID-19 ka, cilmi -baarayaasha dhammaan caalamku wuxuu diirada saaray hal ujeedo- ka takhalusida coronavirus- kan cusub. Dadaalkan caalamiga ah, oo ay weheliso lacag aad u tiro badan oo adduunka oo dhan ah, ayaa naga caawisay inaan gaadhno khadka dhammaadka iyadoo nabadgelyo leh.

5. Carruurta da’doodu tahay 12-15 jirka waxay u muuqdaan inay leeyihiin waxyeellooyin la mid ah kooxaha da’da kale yahay.

Carruurta da’doodu tahay 12-15 jirka waxay leeyihiin waxyeello la mid ah tan dhalinyarada waaweyn.rada ah waxa uu ku leeyahay saamayn caafimaad darro kale sida dhalinyarta kale. Waxyeellooyinka ugu caansan waa:

- Gacanta meesha laga tallaalley oo xanuunta.
- Qandho/Xummad
- Qadhqadhyo/dhaxan
- Daal/noog

Dhibaatooyinka ay keento tallaallada COVID-19 waa astaamo caadi ah oo muujinaya in jirkaaga uu dhisayo difaac ka dhan ah COVID-19. Dhibaatooyinka qaarkood waxay saameyn ku yeelan karaan howlaha maalinlaha ah laakiin waa inay ku baxaan maalmo yar gudahood. Dadka qaar wax saameyn ah kuma laha haba yaraatee.

Dad yar ayaa xasaasiyad ku yeeshay tallaalka, laakiin tani waa mid aad u yar tahay. Si looga badbaaddo, qof kasta oo qaata tallaalka xaqiijiyo, qof kasta oo qaata tallaalka COVID-19 ka waxaa laga codsanayaa inuu joogo xarunta caafimaadka mudo gaaban markiiba (caadiyan 15 daqiiqo) sidaa darteed waa lagala socon karaa wixii fal-celin ah ee la xirriira.

6. Waxaad ka caawin kartaa carruurta inay dareemaan inay diyaar u yihiin inay qaataan tallaalkaaga COVID-19ka.

Waalidiintu kaalin weyn ayey ka ciyaari karaan ka caawinta carruurta inay dareemaan inay diyaar u yihiin tallaalka kasta.

Waxaad kala hadal kartaa iyaga waxa ku saabsan waxa laga filan karo marka ay qaataan tallaalka, iyo waxa dhici kara maalmaha ka danbeeya. Waxay dareemi karaan xoogaa xanuun ah maalin ama labo beri kadib marka ay qaataan tallaalkooda, laakiin ma sii dheereyn doona. Maalmaha ku xiga. Waxa ay dareemi karaan waxoogaa xanuun ah maalin ama laba maalmood kadib marka la talaalo, laakiin mudo dheer ma noqon doono.

Kala hadal sida tallaalku u bari doono jirkooda si loola dagaalamo fayraska COVID-19 ka , iyo sida tallaalka loo helo ay gacan uga geysanayaan ilaalinta qof kasta oo ku hareeraysan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waalidiinta:

- Helitaanka Tallaalka COVID-19ka (Waaxda Caafimaadka Vermont):
www.healthvermont.gov/MyVaccine
- Sayniska ka Danbeeya Tallaalka COVID-19ka: Waalid su'aalaha mar kasta la isweydiyo (Akadamiyadda Cilmiga Caafimaadka Caruurta ee Maraykanka):
www.healthychildren.org/English/health-issues/conditions/COVID-19/Pages/The-Science-Behind-the-COVID--Vaccine-Parent-FAQs.aspx
- Fahmida Sida ay u Shaqeyso Tallaallada COVID-19 ka (Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada): www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/vaccines/different-vaccines/how-they-work.html